

# XOG KOOBAN OO LAGA SOO URUURIYAY XARUMAHA ADEEGGA CAAFIMAADKA ASAASIGA AH EE KA FULINAYA BARNAMIJKA ALMANACH SOMALIA

DISEMBAR 2020



## WAA MAXAAY ALMANACH

Waalidka waxaa muhiim u ah in uu hubiyo in cunugiisu helo daaweynta iyo daryeelka ugu wanaagsan ee la heli karo marka uu xanuunsado. Shaqaalaha caafimaad waxaa muhiim u ah in uu ku kalsoonaado go'aanadiisa iyo in lagu taageero shaqadiisa. Arintan darteed barnamijka ALMANACH ayaa loo sameeyay. Aqoonyahanno ayaa waxa ey ku soo koobeen waxyaabihii ugu danbeeyay cilmiga caafimaadka hal Taablet iyaga oo adeegsanaya shax si loo hubiyo talooyinka caafimaad ee ugu wanaagsan ee la heli karo iyada oo la raacayo shuruucda caalamiga ah ee caafimaadka.

Taabletka ayaa hagaya dadka bixiya adeegyada caafimaad si ey u raadiyaan astaamaha xanuun ee saxda ah, si ey u sameeyaan baaris dhameystiran, si ey u codsadaan shey-baar ey u baahanyihiin in ey go'aan sax ah iyo daaweyn sax sameeyaan, iyo haddii ey u baahdaan in ilmaha aanan lagu daaweyn Karin xarumahooda meelo kale u diraan. Barnamijka ALMANACH ayaa loogu talagalay in lagu isticmaalo xarumaha caafimaad xagga daawada, helitaanka shaqaalaha iyo tijaabooyinka sheybaar, waxaana isticmaali kara xirfadlayaasha caafimaadka oo ey ku jiraan dhaqaatiirta, kalkaaliyeyaasha, shaqaalaha caafimaad ee bulshada ee jooga meelaha fog-fog, oo agabku ku yaryahay. Markii aad cunugaada keento xarunta caafimaad, shaqaalaha caafimaad ayaa baaraya cunugaada iyaga oo

adeegsanaya Taabletka. Shaqaalaha caafimaad ayaa galinaya Taabletka xanuunka cunugaada, isga oo ka duulaya cabashooyinka cunugaada ayaa waxa uu siinayaa shaqaalaha caafimaadka kale waxyaabaha la ogaaday ee saxda ah, iyo sidii si fiicacan loogu daweyn lahaa. Adeegsiga barnaamijka ALMANACH, ayaa kuu fududeynaya adiga waalid ahaan sidii aad ku habsan laheyd in cunugaada loo daweynayo habkii ugu danbeeyay ee caafimaadka, ilmahaagu wuxuu heli doonaa talo caafimaad oo wanaagsan, waxaadna kaliya iibsan doontaa daawada loo baahanyahay. Shaqaalaha caafimaadka waa in aad ka dalbataa in ey isticmaalaan Taabletka marka ey cunugaada daweynayaan, arintaas oo faaiido u ah ilmaha.

Barnaamijka ALMANACH ayaa mar hore laga hirgaliyay Afghanistan iyo Nigeria hadana waxaa laga isticmaalaa xarumaha caafimaad ee Raadeer, Gubadleey, iyo Afgooye. Xarumo caafimaad oo dheeraad ah ayaa laga hirgalin doonaa mustaqbalka.




# XOG KU SAABSAN HABKA UU CUDURKU DADKA U HALEELAY BISHA DISEEMBAR

## TIRADA CARUURTA LA DAWEEYAY

Inta lagu jiray bisha Diseembar 2020, 1273 caruur ah ayaa lagu baaray xarumaha caafimaadka iyada oo la adeegsanayo ALMANACH. Caruurtaas, 644 ka mid ah (oo ah 50.6%) waxa ay ka socdeen Afgooye, halka 387 ka mid ahna (oo ah 30.4%) ay ka socdeen Gubadleey iyo 242 (oo ah 19.0%) ay ka imaadeen Raadeer. marka loo eego jinsiga ay isugu jireen, 690 (oo ah 54.2%) waxa ay ahaayeen lab, halka 583 (oo noqoneysa 45.8%) ay ahaayeen dhedig. Guud ahaan, waxaa jiray hoos u dhac ku yimid tirada caruurta la baaray markii lala bar bar dhigo bishii hore taa oo ay keentay shaqaalaha xarumaha caafimaad oo fasax ku maqnaa.

## TIRADA BAARITAANADA LA SAMEEYAY INTA LAGU JIRAY BISHA DISEEMBARR



Baaritaanada badankood waxa ay ahaayeen booqashooyin cusub (95.3%), tiro yar oo ka mid ah ayaa aheyd baaritaano soo noqosho ah (4.0%) iyo tiro aad u yar oo ah 0.3% oo ah caruur la soo celiyay xaaladooda caafimaad oo xumaatay awgeed ama xaaladooda oo aan hagaagin.

## MAAREYNTA XAALADHA DHIIG LA'AANTA

	AFGOOYE	GUBADHLEEY	RAADEER	TIRO GUUD
Dhiig la'aan	2	12	5	19
Dhiig la'aan daran	1	0	0	1
	3	12	5	20
Heerka baahsanaanta	0,2%	0,9%	0,4%	1,6%

Intii lagu jiray bisha Diseembar waxaa jiray 19 xaaladood oo dhiig la'aan ah oo la helay iyada oo la kaashanayo ALMANACH ( Afgooye oo 2 ah, Raadeer oo 5 ah iyo Gubadleey oo 12 ah) iyo 1 xaalad oo dhiig la'aan daran ah oo Afgooye laga helay. Gubadleey ayaa waxaa wali laga helayaa tiro badan oo dhiig la'aan ah taas oo laga yaabo in ay keeneyso xaaladaha nafaqo darrada ah oo aad ugu badan.

# QEYBTA HUBINTA IYO KALA SAARIDDA

Mid kasta oo ka mid ah xarumaha caafimaadka, heerkulka, miisaanka, iyo cabirka gacanta ayaa la sameeyaa ka hor inta aan bukaanka la galin qolka baaritaanka, arintan ayaa sida caadiga ah la sameeyaa markii bukaanado yimaadaan xarunta caafimaad iyada oo loo hogaansamayo tilaabooyinka looga hor tagayo caabuqa Covid 19. Ku dhawaad caruurta oo dhan miisaankoodu waxa uu ahaa (99.7%) heerkulkooduna waxa uu ahaa (99.9%). Cabirka gacanta ayaa loo sameeyay 1378 caruur ah oo 6 bilood ka weyn iyada oo natiijada lagu muujiyay shaxda hoose:

MIDABKA	#	%
Cagaar	1013	85,5%
Jaalle	143	12,1%
Casaan	29	2,4%
<b>Tiro guud</b>	<b>1185</b>	<b>100,0%</b>


Caruurtii la baaray badankood oo ah (85,5%) waxa ay ku jireen qeybta qeybta furaha cagaaran taa oo macnaheedu yahay in xaaladooda nafaqo ay caadi tahay halka 12.1% ay ku jireen qeybta jaallaha ah oo sheegeysa nafaqo darri dhex-dhexaad ah kuwaas oo loo diray barnaamijka nafaqeynta dheeraadka ah ee ugu dhow (SFP). Kaliya 2.4% oo caruurta ah ayaa laga helay nafaqo darrida aadka u daran (red MAUC) waxana loo gudbiyay xarunta daweynta bukaan socod eegtada (OTP) si loo maareeyo xaaladooda. Hooyooyinka keena caruurta leh astaanta furaha cagaaran waxaa la siiyaa farriimo caafimaad oo ku saabsan sidii ay u ilaalin lahaayeen xaaladda wanaagsan ee nafaqo ee caruurtooda.

## DUUMO

DUUMO	AFGOOYE	GUBADHLEEY	RAADEER	TIRO GUUD
Cudur leh qandho daran sida Duumada	0	0	0	0
codur leh qandho daran oo aan malaria ahayn	1	0	0	1
Duumo daran	0	0	0	0
Duumo suuro-gal ah	22	22	62	106

Intii lagu jiray bisha Diseembar, waxaa jiray kaliya 1 xaalad oo qandho ah oo aan Duumo ahayn oo lagu arkay xarunta caafimaadka Afgooye. Bukaanka waxaa loo gudbiyay isbitaalka Afgooye si daweyn dheeraad ah loogu sameeyo. Dhammaan xarumaha caafimaadka, waxaa jira xirmooyin tijaabo ah oo lagu ogaanayo cudurka duumada (RDTs) ALMANACH ayaa soo jeedineysa in dhammaan caruurta qandhada leh laga baaro cudurka Duumada. Waxaa jira 106 xaaladood oo qandho ah (Duumo suuro-gal ah) oo lagu arkay saddexda xarun caafimaad (Afgooye 22, Gubadleey 22 iyo Raadeer 62) laakiin aan ahayn Duumo la xaqiijiyay.

## QORISTA DAAWOYIN ANTIBIYOOTIGGA AH



Waxaa jira xaalado gaar ah oo aan u baahneyn in la qoro antibiyootik, waxaa ka mid ah caabuqa ku dhaca habdhiska sare ee neefsashada iyo URTI. Tilmaamaha ALMANACH ee sheegaya inta lagu qori karo antibiyootigga xanuunka URTI dhaqaaq waa <15%.

Bisha Diseembar 2020, dhammaan xarumaha caafimaad waxa ay ka hooseeyaan cabirkii la dajiyay ee ahaa <15%. Gubadleey iyo Raadeer oo aad u sareeyay Nofeembar ayaa ayaa si weyn xaaladoodu u hagaagtay. Haddii aan dib u eegno mudadii ka horeysay hirgalinta ALMANACH laga bilaabo Luulyo ilaa Sebteembar 2020 markaas oo aan ALMANACH la hirgalin tiradu waxa ay cagacageyneysay >50% sida laga dheehan karo shaxda sare.

## CAABUQA DHAGAHA

Caabuqa dhagaha aadka u daran dheecaankana wata waxa uu ka dhigan yahay 86%(108) xaaladaha caabuqa dhagaha ee lagu baaray saddexda xarun caafimaad. Kaliya 13.5%(oo ah 17) ka mid ah caruurta ayaa laga helay caabuqa dhagaha aadka u daran oo dheecaan wata. Kaliya 1 xaalad oo ah caabuqa dhagaha oo aad u daran oo aanan antibiyootik la siin ayaa la arkay.

## CAABUQA NEEF MAREENKA

Qufaca/neefsashada oo adkaata iyo caabuqa neef mareenka sare ayaa wali ah kuwa ugu badan ee laga helo xaaladaha neef mareenka iyaga oo ka dhigan 54.5% iyo and 37.4% xaaladaha guud sida ay u kala horeeyaan ee la baaray bishii hore. Labo xaaladood oo oof wareen daran ah ayaa lagu arkay Gubadleey kuwaas oo loo gudbiyay isbitaalka ugu dhow. Baahsanaanta ugu sareysa ee ah xaaladaha neefsashada wali waa xarunta caafimaadka Afgooye (37%) iyada oo baahsanaanta ugu yar markan ay noqotay Gubadleey (14%) marka lala bar bar dhigo xogtii bisha Nofeembar taas oo sheegeysay in baahsanaanta ugu yar ay tahay xarunta caafimaadka ee Raadeer.

## XAALADHA XANUUNKA KU DHACA CALOOSHA

Intii lagu jiray bisha Diseembar, waxaa guud ahaan la helay 212 xaaladood oo ah xaaladaha xanuunka ku dhaca caloosha kaas oo kordhay 11.5% marka loo eego baaritaanadii Nofeembar. Taas oo macnaheedu yahay in ay bateen xaaladaha lagu arkay laguna daaweeyay xarumaha caafimaadka. Shuban biyoodka ba' an ayaa waxa uu ka dhiganyahay 56% wadarta xaaladaha lagu arkay cudurka sentariyada oo ah 37.2%. Baahsanaan sareysa ayaa lagu arkay Afgooye (8.4%) iyo Raadeer (5.2%) sidii dhacday bishii Nofeembar.

## CAABUQA DHUUNTA

Waxaa jiray 162 xaaladood oo caabuqa dhuunta ah oo lagu arkay sadexda xarun caafimaad iyada oo Afgooye laga helay 78% oo xaaladihii labaaray ah inta bisha lagu jiray ah. Cudurka caabuqa dhuun xanuunka oo aan dhib badneyn ayaa noqonaya kan ugu sareeya boqoleey ahaan (83%) caabuqa ku dhaca dhuunta. Raadeer ayaa heshay baahsanaanta ugu yar.

## CUDURRO KALE

Waxaa jiray 30 xaaladood oo daaf ah sadexda xarumood iyada oo gubadleey iyo Afgooye laga soo sheegay 13 iyo 12 xaaladood sida ay u kala horeeyaan. Raadeer waxaa kaliya laga helay 5 xaaladood. Jadeeco- laba xaaladood oo adag ayaa lagu arkay Raadeer waxaana loo gudbiyay isbitaalka ugu dhow si xaaladooda loo maareeyo.


# KA HOR TAGGA

## FITAMIIN A IYO GOORYAAN KA DILIDDA BISHA DISEEMBAR 2020

	VIT A		GOORYAAN DILIDDA	
	#	%	#	%
Afgooye	537	83%	394	61%
Gubadhleey	197	51%	172	44%
Raadeer	206	85%	183	76%
Tiro guud	<b>940</b>	<b>74%</b>	<b>749</b>	<b>59%</b>

Markii loo bar bar dhigo bishii la soo dhaafay, waxaa jiray sare u kac ku yimid tirada caruurta la siiyay Fitamiin A. si kasta ha ahaatee, waxaa sidoo kale jiray hoos u dhac la taaban karo oo ku yimid tirada caruurta la siiyay kaniiniga gooryaanka laoga dilayo. Arintan ayaa waxaa keeni kara tirada caruurta la baaray bishan oo yareyd.

### TALAALKA:



Talaalka caruurta ka yar 5ta sano waa ka ka hor tag muhiim ah oo u baahan in aad kor loogu qaado xarumaha caafimaadka.

ALMANACH ayaa ku caawineysa shaqaalaha caafimaadka in xasuusnaadaan in weydiiyaan haddii canugga la talalaalay iyo haddii kale. Waxaa xusid mudan in Antigens badan kood ay kordheen bishii la soo dhaafay sadexda xarumoodba. Si kasta ha ahaatee, waxaa hoos u dhacay qaadashada talaalka jadeecada dhammaan xarumaha caafimaad. Afgooye waxaa xoogaa hoos u dhacay Penta 2 iyo 3 halka ay BCG ay iyana hoos u dhacday Gubadleey. Saraakiisha caafimaadka ALMANACH ayaa soo saari doona sababaha ay hoos ugu dhacday isticmaalka Antigenskan muhiimka ah.

## GABAGABO

Waxaa jira hoos u dhac ku yimid tirada caruurta 5ta sano ka yar ee la baaray bisha Diseembar. Arintan ayaa loo aaneynayaa kalkaaliyeyaasha qeybta caruurta 5ta sano ka yar oo fasax ku jiray iyo arin labaad oo ah abaabulkii bulshada tuulooyinka oo yaraaday.

Xaalado dhiig yari ah oo kuwii hore ka yar ayaa la aqoonsaday lana daaweeyay sida ku xusan shaxda (Algorith).

Hirgalinta ALMANACH ayaa si weyn gacan uga geysatay hoos udhaca ku yimid qorista daawada antibiyootigga ee caabuga neef mareenka sare. Tirooyinkii ka horeeyay hirgalinta ALMANACH waxa ay ahaayeen >80% laakiin sadex bilood hirgalinta ALMANACH ka dib, bisha Diseembar, dhammaan xarumaha caafimaadku waxa ay soo tabiyeen <15% oo ah antibiyootiggii loo qoray URI. Tiradan ayaa waxa ay ku jirtaa xadka tilmaamaha ALMANACH.

# SAAXIIBKA AAN SHAQO WADAAGGA NAHAY SWITZERLAND GUDAHEEDA

Barnaamijka ALMANACH ee Somalia waxa uu ka dhashay afar sano oo khibrad iyo rabitaan dhaba ah oo laga dhaxlay iskaashi adag oo dhexmaray Guddiga caalamiga ah ee Laanqeyrta cas iy heyadda Swiss TPH. Koox ka socota hey-adda Swiss TPH ayaa wax ka badaleysa barnaamijka shaxda caafimaadka sidoo kalena barogaraamineysa softiweerka, si barnaamijka ALMANACH uu mar walba u ahaado mid wata waxyaalihii ugu danbeeyay dhanka caafimaadka kuna habboon Soomaaliya.

Laakiin hey-adda Swiss TPH waa tuma? Hey-adda lagu magacaabo The Swiss Tropical and Public Health Institute (Swiss TPH, [www.swisstph.ch](http://www.swisstph.ch)) waa machad hogaaminaya caafimaadka aduunka si gaar ahna diiradda u saaraya dalalka dhaqaalahoodu hooseeyo iyo kuwa dhaqaalahoodu dhexdhexaadka yahay. Kooxo ka tirsan hey-adda Swiss TPH ayaa waxa ey ka shaqeynayaan fikrado cusub sida barnaamijka ALMANACH oo kale waxa eyna isku xirayaan cilmi baarista, waxbarashada iyo adeegyada dhaqangalinta gudaha, heer qaran iyo heer caalami. Ujeedkeennu waxa uu yahay in sayniska iyo waxyaabaha cusub ee soo kordha aan saameyn wanaagsan u yeelno si aan u suurogalinno helidda daawooyin iyo tallaaf aad u wanaagsan oo aan gaarsiino dadka, bulshooyinka, iyo dadka go'aannada qaata hab aan ku hagaajin karno caafimaadka guud ahaan aduunka.

Qiyaastii 850 qof oo kasoo kala jeeda 80 dal ayaa ka shaqeeya hey-adda Swiss TPH, iyaga oo diiradda saaraya cudurrada la isku gudbin karo iyo kuwa aanan la isku gudbin Karin, deegaanka, bulshada iyo caafimaadka iyo sidoo kale nidaamyada caafimaad ee jira.

Sanadka 2020, hey-adda Swiss TPH ayaa maamuleysa in ka badan 285 mashruuc in ka badan 100 wadan. Barnaamijka ALMANACH ee Soomaaliya ayaa ka mid ah mashruucyadaas.



Xarunta taariikhiga ah ee hey-adda Swiss TPH ee magaalada Basel Basel

# ALMANACH IYO BULSHADA


Barnaamijka ALMANACH waa barnaamij ku cusub Soomaaliya oo u baahan bulshadu in ey taageeraan eyna dareemaan in ey iyagu leeyihiin. Si arintan loo xaqiijiyo, ayaa kooxda barnaamijka ALMANACH waxa ey sameeyeen olole lagu wacyi galinayo bulshada si kor loogu qaado fahamka bulshada ee barnaamijkan. Kooxda barnaamijka ALMANACH waxa ey marka hore wacyigalin u sameeyeen shaqaalaha xarunta caafimaad (kalkaaliyeyaasha, ololeeyeyaasha caafimaad, guddiyada bulsho ee caafimaadka (CHCs) iyo shaqaalaha caafimaadka bulshada ee dumarka ah (FCHWs) iyaga oo isticmaalaya qalab waxbarasho oo kala duwan oo loo sameeyay barnaamijka (sabuurado iyo sawirro). Intaa kadib, ayaa ololeeyeyaasha caafimaad oo ey la jiraan CHCska and FCHWska ayaa waxa ey sameeyeen jadwal lagula kulmayo bulshada si looga dhaadhiciyo barnaamijka ALMANACH. Doodda ayaa waxa ey ku saabsaneyd cidda ka faa'iideysaneysa iyo faa'iidada uu leeyahay barnaamijka ALMANACH, iyada oo la isla soo qaaday sheekada Bishaara oo ah gabar ka soo muuqatay shaxda dadka wax lagu tusayay si loo dhaliyo dood bulsho sidoo kalena loo soo dhaweeyo waxyaabaha ey u soo joogeen iyo xaaladaha ey la kulmeen. In aan helno falcelinta iyo aragtida bulshada aad ayey muhiim noogu tahay si aan u hormarino barnaamijka. Ka qeyb galinta bulshada ee barnaamijka ma ahan wax inta hal mar la sameeyo kadibna halkaas ku dhammaada, waa howl mar walba ka socota saddexda xarun caafimaad. Ujeedkuna waxa uu yahay in la helo bulsho fahmeysa, taageereysa, sidoo kalena ka faa'iideysaneysa barnaamijka.

## WAA MAXAY ALGORITHM?


Marar badan ayaad maqashay in barnaamijka ALMANACH uu ku shaqeeyo waxa loo yaqaanno algorithms laakiin su'aasha ayaa ah waa maxay algorithm? Algorithmku waa tallaabooyin dhowr ah oo la raacayo si loo dhameystiro howl. Xitaa habka loo sameynayo doolsho shukulaato ka sameysan ayaa noqon kara algorithm: Maxaa yeelay waxbaa la isku dardarayaa (ingredients) kadib ayaa wax ka soo baxayaan (the chocolate cake). Waxa aan dhihi karnaa algorithmku waa "tallaabooyin dhowr ah". Sida iska cad, shaxda caafimaad ee uu ka sameysanyahay barnaamijka ALMANACH wey ka dhib badantahay habka la raacayo marka la sameynayo doolsho shukulaato ka sameysan laakiin ujeedka ayaa isku mid ah.

Kumbuyuutarka yar ee uu heysto shaqaalaha caafimaad ayaa u tilmaamaya tallaabooyinka uu dhameystirayo si cunugaada loogu helo baarista ugu wanaagsan ee la heli karo. Barnaamijka ALMANACH ayaa hagaya kalkaaliyaha laga billaabo helista astaamaha cudurka iyo samameynta baarista, dalbashada tijaabo shey-baar si loo ogaado cudurka loona daweeyo. Tallaabooyinkan ayaa ah kuwo cilmi ahaan la tijaabiyay lana aqoonsanyahay caalamiyan.

## SHAXDA LAGU DIYAARINAYO DOOLSHO KA SAMEYSAN SHUKULAATO




## SHAXDA LAGU HELO DHIIG YARIDA IYADA OO LA ADEEGSANAYO ALMANACH



# CAABUQA COVID-19

Soomaaliya ayaa laga soo sheegay isugeyn 4,744 xaaladood oo Covid-19 ah iyo 130 dhimasho ah ilaa xaaladdii ugu horeysay oo la soo tabiyay oo Covid-19 ah bishii Maarso 2020. Hadda waxaa jira 948 xaaladood.

**FIGURE 1: HABKA SHAQO EE LOO SOO JEEDIYAY XARUNTA CAAFIMAAD EE AFGOOYE**



# COD KA IMANAYA GOOBTA SHAQADA

Nasra (oo ah kalkaaliso ka tirsan qeybta caruurta 5ta sano ka yar) ayaa tiri ‘‘ALMANACH waxa uu nagu caawiyaa gudbinta farriimnaha saxda ah tusaale ahaan naas nuujinta gaarka ah ee caruurta 6da bilood ka yar, bulshada fahamkeedu wuu soo badanayaa, heerka waxbarashada caafimaad iyana wey kordheysaa’’

‘‘Isbadalladii ugu waaweynaa iyo waxyaabihii la hagaajiyay waxa ay ka muuqdeen habka cudurka loo ogaanayo iyo daweynta caabuqa neef mareenka, caabuqa dhagaha, iyo dhiig yarida aadka u daran. ALAMANACH waxa ay aad haboontahay hagidda shaqaalaha caafimaadka’’ Mohamed (kalkaaliye ka tirsan qeybta caruurta 5ta sano ka yar ee Raadeer)

## SAWIRKA XARUNTA CAAFIMAADKA RAADEER.



Mohamed (oo ah kalkaaliye ka tirsan qeybta caruurta 5ta sano ka yar ee Raadeer) oo sameynaya baaritaan isaga oo adeegsanaya ALMANACH.

# TALLAABOYINKA XIGA

Intii lagu jiray bisha, kooxda ALMANACH ayaa waxa ay sameeyeen qorshe waxqabad oo faah-faahin ka bixinaya tallaabooyinka xiga ee hirgalinta barnaamijka. Wacyigalinta guddiga caafimaadka bulshada, dadka u ololeeya caafimaadka iyo shaqaalaha caafimaadka bulshada ee dumarka ah ayaa la sameeyay iyada oo loogu diyaar garoobayo tababarka loo sameynayo kalkaaliyeyaal ka tirsan qeybaha caruuta 5ta sano ka yar oo ka kala socday xarumaha caafimaad ee Howlwadaag, Farjano Beledweyn, iyo sidoo kale kalkaaliyeyasha qeybaha caruurta 5ta sano ka weyn ee Raadeer, Afgooye iyo Gubadleey.

Ujeedka laga leeyahay wacyigalinta ayaa waxa uu ahaa in la hubiyo in bulashu ay si buuxda u fahmayaan barnaamijka ALMANACH marka laga eego inta uu gaarayo, cidda loogu talo galay iyo faa'iidooyinka barnaamijka. Waxaa intaa dheer, tababarka ka hor, kooxdu waxa ay qaban doontaa daraasad kormeer caafimaad ah oo ay ka sameyneyso xarumaha caafimaad ee Howlwadaag, Farjano iyo Beledweyn si loo fahmo isticmaalka iyo u hogaansamidda tilmaamaha IMCI. kormeerkan caafimaad ee tooska ah ayaa waxa uu gundhig u noqon doonaa habka loola soconayo oo loo qiimeynayo isbadallada la filayo iyo horumarka ee tayada daryeelka la bixiyay oo loogu talo galay maareynta caruurta xanuunsan iyada oo la adeegsanayo ALMANACH.

Haddii ey ku soo jiidatay xogtan kooban, ama aad heyso talo ama su'aal, amaba aad dooneysid in aad nala shaqeyso, ha ka labalabeynin! Email ama farriinta gaaban ee whatsappka ayaad u qori kartaa Hasan Ali: [habdulahiali@icrc.org](mailto:habdulahiali@icrc.org); WhtasApp +254 722 409106

*ALMANACH dadka ayaa si kalgaceyl leh loogu sameeyay Kooxda ALMANACH*

ICRC Somalia Delegation  
Denis Pritt Road  
P.O. Box 73226 - 00200  
T +254 20 2719 301  
Nairobi, Kenya

Xafiisyadha ICRCda ee Mogadishu, Kismayo,  
Garowe, Baidoa, Beledweyne and Hargeisa.  
[www.icrc.org](http://www.icrc.org)  
Cover photo: Mohamed Ahmed/SRCS  
© ICRC, Janaayo 2021

Guddiga caalamiga ah ee laanqeyrta cas ICRC waxay caawisaa dadka ku nool adduunka ee ay saameeyeen iska horimaadyada hubaysan iyo xaaladaha kale ee rabshadaha ah, iyagoo sameynaya wax kasta oo ay awoodaan si ay u ilaashadaan sharaftooda una yareeyaan dhibkooda, inta badan Ururka Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas. wuxuu kaloo raadinayaa inuu ka hortagto dhibaatooyinka iyadoo la dhiirigelinayo laguna xoojinayo sharciga bini'aadinnimada iyo in lagu guuleysto mabaadiida bin aadinnimada ee caalamiga ah.

 [facebook.com/ICRCAfrica](https://facebook.com/ICRCAfrica)  
 [twitter.com/ICRC\\_Africa](https://twitter.com/ICRC_Africa)

 [instagram.com/icrc\\_afrique](https://instagram.com/icrc_afrique)  
 [blogs.icrc.org/Somalia](https://blogs.icrc.org/Somalia)